# Video Highlights for Dual Language Designation

## Ujeeddada Video Highlights waa in:

La aqoonsado meelaha barnaamijku ku wanaagsan yahay iyo meelaha uu ku horumari karo.
Lagu dhiirrigeliyo in barnaamijku dib u milicsado shaqadiisa isagoo adeegsanaya xogta.
La taageero horumarinta joogtada ah ee tayada barnaamijka.
La muujiyo sida carruurtu wax ugu bartaan Ingiriisiga iyo luuqadda lammaanaha ah ama luuqadda Qabiilka.

## Waxa Loola Jeedo Dual Language

**Barashada Laba-Luuqadoodka ah (Dual Language Learning)** waxay dhacdaa marka carruurtu isku mar wax ku bartaan laba luuqadood—badanaa Ingiriisiga iyo luuqad kale oo lagaga hadlo guriga ama bulshada. Ugu yaraan kala bar waxbarashada waxaa lagu bixiyaa luuqadda lammaanaha ah.

Fasallada laba-luuqadoodka ah ee qaybta ka ah aqoonsigan:

- Waxay carruurta kula hadlaan luuqadda lammaanaha ah ee barnaamijka **50%–90%** wakhtiga.
- Waxay luuqad kasta si ula kac ah u isticmaalaan waqtiyo la qorsheeyay, isu dheellitiran, oo la sii og yahay inta lagu jiro maalinta.

Habkani wuxuu carruurta ka caawiyaa inay noqdaan kuwo laba luuqadood ku hadli kara oo labada luuqadood wax ku akhriyi kara kuna qori kara, iyadoo isla markaana la xoojinayo **aqoonsigooda dhaqan** iyo **xiriirka qoyska**.

## Waxa Loola Jeedo Dib-u-soo-nooleynta Luuqadaha Qabiillada

Barnaamijyada Dib-u-soo-nooleynta Luuqadaha Qabiillada (Tribal Language Revitalization) waa dadaallo ay Qabiilladu iyagu madax-bannaan u hoggaamiyaan, bulshaduna hormuud ka tahay, kuwaas oo loogu talagalay ilaalinta, xoojinta, iyo dib-u-soo-celinta luuqadaha Qabiillada.

- Barashada luuqaddu waxay ku salaysan tahay aqoonta Qabiilka, waxbarista dhaqanka, iyo waxyaabaha ay bulshadu mudnaanta siiso.
- Carruurtu waxay luuqadda ku bartaan sheekooyin, heeso, hawlo dhaqameed, iyo waayo-aragnimada maalinlaha ah.
- Waxbarashada waxaa bixin kara dadka ay Qabiilladu u xilsaareen, dadka haya aqoonta dhaqanka, ama shaqaale kale oo loo magacaabay baridda luuqadda.

Barnaamijyadani waxay raacaan hababka barashada luuqadda ee ay Qabiilladu iyagu qeexeen, mana raacaan habka 50/50 ee labada luuqadood.

## Shuruudaha Muuqaalka

**Fasallada Barnaamijyada Laba-Luuqadoodka ah**

Fasal kasta oo loo aqoonsaday Barnaamij Laba-Luuqadood ah waa inuu:

- Soo gudbiyaa **laba** Video Highlights:
  - Mid ku baxa Ingiriisi
  - Mid ku baxa luuqadda lammaanaha ah
- Muuqaal kasta waa inuu:
  - Muujiyaa macallinka iyo carruurta oo isticmaalaya luuqadda la barayo, oo ay ku jirto ugu yaraan hal ilmo oo aan qaraabo la ahayn macallinka.
  - Ahaadaa 10–15 daqiiqo, isla markaana muujiyaa is-dhexgal macno leh oo u dhexeeya shaqaalaha iyo carruurta.
  - Leeyahay muuqaal iyo cod cad oo tayo leh.
  - Ku jiraa dib-u-milicsi dhammaystiran.

**Fasallada Dib-u-soo-nooleynta Luuqadaha Qabiillada**

Video Highlights **loogama baahna** Fasallada Dib-u-soo-nooleynta Luuqadaha Qabiillada. Taa beddelkeeda, barnaamijyadani waxay soo gudbin karaan tusaalooyin muujinaya sida luuqadda iyo dhaqanka loogu daro hawlahooda maalinlaha ah, toddobaadlaha ah, ama sannadlaha ah.

Tusaalooyinka caddeymaha la aqbali karo waxaa ka mid ah:

**Jadwalka Barnaamijka**

- Soo geli sawir ka mid ah jadwalka maalinlaha ah, toddobaadlaha ah, ama sannadlaha ah oo muujinaya sida barashada luuqadda iyo dhaqanka loogu daray.

**Sharaxaadda Waqtiga Waxbarashada**

- Bixi sharaxaad kooban oo ku saabsan sida waqtiga waxbarashada loo isticmaalo si la isugu dheellitiro barashada luuqadda iyo dhaqanka iyo hawlaha kale ee fasalka.

**Fiiro gaar ah:** Fasal kasta oo Dib-u-soo-nooleynta Luuqadaha Qabiillada ah oo lagu daray aqoonsiga waa inuu soo gudbiyaa caddeyn.

## Soo Gudbinta Muuqaalka

**Fasalka Barnaamijka Laba-Luuqadoodka ah**

Macluumaadka hoose wuxuu sharxayaa cidda ay tahay inay dhammaystirto oo soo gudbiso Video Highlights. Tilmaamahan, “macallimiinta” waxaa loola jeedaa macallimiinta hoggaamiyeyaasha ah iyo kuwa kaaliyeyaasha ah labadaba.

- **Hal macallin hoggaamiye oo laba-luuqadood ku hadla** ayaa soo gudbin kara **labada** muuqaal (Ingiriisi iyo luuqadda lammaanaha ah).

AMA

- **Laba macallin oo midkiiba hal luuqad wax ku dhigo** (Macallin Hoggaamiye iyo Macallin Kaaliye):
    - Macallin kasta wuxuu soo gudbiyaa hal muuqaal oo ku baxa luuqadda uu wax ku dhigo.
    - Macallimiinta kaaliyeyaasha ahi waxay soo gudbin karaan hal muuqaal oo keliya oo ku baxa luuqadda loo xilsaaray inay wax ku dhigaan.

## Barnaamijyada Qabiillada ee ka qaybqaata The LOVIT Way

Barnaamijyada ka qaybqaata The LOVIT Way waxay sii wadi doonaan inay isticmaalaan The LOVIT Way Program Evaluation Process (PEP).

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga heli karaa **Dual Language Designation Implementation guide**.